# Gargaarka aaska ee Coronavirus (COVID-19)

Faafida cudurka fayraska loo yaqaan COVID-19 waxay murugo badan u keentay qoysas badan. Hay'adda FEMA, hadafkeedu waa inay caawiso dadka xilliga masiibooyinka, ka hor iyo ka dib. Waxaynu aad iskugu xilqaannaa inaan gacan ka geysanno yareynta qaar ka mid ah culeyska maaliyadeed iyo culeyska uu sababay fayrasku.

**Hay'adda FEMA waaxay bixineysaa kaalmo lacageed ee kharash yada aaska la xiriira cudurka fayraska loo yaqaan COVID-19 ee la galay muddada ka dambeysay Janaayo 20, 2020.**



### Si aad ugu qalantid gargaarka aaska, waainaad buuxisaa shuruudaha soo socdo:

- Dhimashadu waa nay ka dhacday waddanka Mareykanka.
- Codsaduhu waa inuu noqdaa muwaaddin Mareykan ah, Muwaaddin dal kale oo sharciyeysan ama si sharci ah ku joogay dalka oo yeeshay kharash aaska. Kharash la galay Kaddid bsha Janaayo 20, 2020.
- Ma jiro wax shuruud ah qofka dhintay nuu ahaa muwaaddin Mareykan ah, muwaaddin shisheeye oo sharciyeysan.
- Shahaadada dhimashada ee qofka dhintay waa inay muujisaa in geerida loo sababeeyey ama ay sababtay cudurka fayraskaloo yaqaan COVID-19. Haddii geeri dhacdo inta u dhaxeyso Janaayo. 20 iyo May 16, 2020, oo shahaadada dhimashada aysan dhimashada u nisbeyn COVID-19, soo raaci bayaan saxiixan oo ka yimid sarkaalka caddeeynaya shahaadada dhimashada , baadhaha maxalliga ah ama baaraha caafimaadk ee xiriiriyaha sababta dhimashada COVID-19.

### Waa kuwee kharashyada u qalmi doono in laga dhiibo?

Tusaalooyinka kharashyada u qalma waxaa ka mid noqon kaa, laakiin aan ku xaaddidnayn:

- Kharashka gaadiidka lagu aqoonsado qofka dhintay
- Wareejinta haraaga
- Goob aaska ama meel maydka lagu gubo
- Summadeynta dhagaxa.
- Adeegyada wadaaddada ama hawlwadeennada
- The use of funeral home equipment or staff
- Kharashka gubista maydkaama goy

### Waa kuwee macluumaadka aan u baahan ahay inaan siiyo FEMA?

Fadlan hayso macluumaadka soo socda ka hor inta aadan la xiriirin FEMA si aad u dalbato:

- Magaca, nambarka soshal sekuuritiga, taariikhda dhalashada, cinwaanka boostada iyo lambarada taleefanada xiriirka.
- Magaca, lambarka soshal sekuuritiga iyo taariikhda dhalashada ee shaqsi kasta oo dhintay.
- Goobta iyo cinwanka ee qofka dhintay.
- Duknumiintiyada iyo rasiidhada ee wixii kaalmo ah ee hore looga helay ilo kale, oo ay ku jiraan kharashka aaska ama caymiska aaska, deeqyada, hay'adaha iskaa wax u qabso, barnaamijyada kale ee dawladda ama ururrada aan macaash doonka ahayn.
- Magaca iyo macluumaadka qof kasta oo kugula codsadey (yaasha) haddii qof aan adiga ahayn uu ku baxay kharashkii aaska ee qofka dhintay.

## Sidee ayaan u codsadaa kaalmadan?

**Wac FEMA COVID-19 laynka Kaalmada aaska ee ka wac**
1-844-684-6333
(TTY: 800-462-7585)
waqtiga 9 a.m. to 9 p.m. ET,
Isniin– Jimco iyo bilow habka qorista dalabka.

**Kaddib codsigaaga, adeegga ugu dhaqsaha badan, waxaad bilaabi kartaa soogudbinta dukumentiyada habkaintarneedka** Disasterassistance.go, **habka faks 855-261-3452.**

Dukumentiyada waxaa kale loo diri karaa : COVID-19 Funeral Assistance P.O. Box 10001 Hyattsville, MD 20782

**Waxaa kale aad naga booqan kartaa** FEMA.gov/funeral-assistance/faq.
Macluumaadka waxaa lagu bixiyaa luqado dhowr ah telefoonka iyo mareegaha intaba

FEMA